# Long-Range Facility Plan

**Guudmar**

Dugsiyadda Dadweynaha ee Portland waxa ay hadda soo saarayaan Qorshe Xarun Muddo Dheer ah kaas oo is waafajin doona aragtida waxbarasheed ee degmada iyo qorshaynta raasamaalka ee mustaqbalka. Wakhtigan muhiimka ah ee taariikhda halkaas oo dhacdooyinkii u dambeeyey ar dardar geliyeen wacyiga sii koraya ee sinnaan la'aanta qowmiyadeed ee nidaamsan, Qorshaha Xarumaha Muddada Dheer waxa ay metelayaan fursad lagaga dhaliyo isbeddel waara dugsiyada Portland taas oo dib u qeexi karta waxdhigista iyo waxbarashada magaaladeenna. Waanu ognahay in aanu boosku dhexdhexaad ahayn iyo in boosaska khibradaha waxbarasho aanay ahayn kuwo caalami ah. Xaqiiqdii, aragtiyaha ardaydu ka haystaan deegaannada la dhisay qayb ahaan waxa qaabeeya aqoonsiyadooda iyo khibradahooga nololeed.

Ujeedka qorshahani waa in la bixiyo deegaano waxbarasho oo loo dhan yahay, oo tayo leh kuwaas oo taageeraya baahiyaha waxbarasho, bulsho, iyo dareen ee ardaydeenna. Qorshaynta lagu guulaysto ee natiijadani waxa ay noqon doontaa isku dhaf saddex aag ah:

- Shuruudaha barnaamijka waxbarasho ee hadda iyo mustaqbalka
- Isqorista iyo kartida
- Xaaladda xarunta

Shaqadani waa fursad lagaga dhalinayo isbeddel waara dugsiyadeena iyada oo dib loo sawiranayo deegaanada waxdhigista iyo waxbarashada. Iyada oo loo marayo habraac dhab ah, loo dhan yahay, oo daah furan, waxa aanu kasoo ururin doonaa fikradaha bulshooyin kala duwan waxana aanu sameyn doonaa aragti ku dayasho mudan oo dhiirrigelin ah mustaqbalka.

Baadhitaankayaga bulsho-goobeed waxa uu iftiimin doonaa xidhiidhka ka dhexeeya deegaanka la dhisay iyo sinnaan la'aanta bulshada, isaga oo ina xusuusinaya in goobtu muhiim tahay marka la qiimaynayo sinnaanta waxbarasho.

**Waddadayada**

PPS waxa ka go'an geedi socodka qorshaynta bulshada ku salaysan oo ay hagayso wacyigelin loo dhan yahay iyo ka qaybgal dhab ah. Iyada oo ah waddo loo marayo sinnaanta qowmiyadeed iyo cadaaladda bulsheed, Aragtida Qowmiyadeed ee Dhaleecaynta (CRT) ayaa loo adeegsan doonaa in loo qaabeeyo geedi socodka qorshaynta qaab keenaysa codadka bulshooyinka hoos loo dhigo taariikh ahaan halka hore, taas oo keenaysa fahan hodan ah oo xeeldheer in loo yeesho baahiyaha iyo khibradaha dhammaan qaybaha. CRT waa qaab loo adeegsanayey waxbarashada ugu yaraan 30 sanadood oo ah xeelad sinnaan iyo kamid noqosho. Iyada oo loo marayo mabaadi' wejiyo badan oo isku xidhan, CRT waxa ay fiiro gaar ah u leedahay cunsuriyadda nidaamka, sheekooyinka ugu badan, iyo khibradaha nololeed ee dadka midabka ah. Marka lagu dabbaqo qorshaynta iyo qaabaynta, CRT waxa ay bixinaysaa waddo hal abuur leh oo kor loogu qaadayo codadka bulshooyinka midabka ah, lagu baadhayo sida goobaha waxbarashadu ugu dhaqmaan soo saaridda sinnaan la'aanta, loona aqoonsado farsamooyinka qorshaynta machadeed kuwaas oo kor u qaada sinnaanta qowmiyadeed iyo cadaaladda bulsheed.

CRT waxa ay iftiimisaa xidhiidhka ka dhexeeya adduunka maaddiga ah iyo sinnaan la'aanta bulsheed, iyada oo ina xusuusinaysa in boosku muhiim yahay marka la qiimaynayo sinnaanta waxbarasho. In mawduuca ugu muhiimsan laga dhigto codadka bulshooyinka la faquuqay waxa ay inaga caawisaa inaynu fahanno sida ay isugu xidhan yihiin kala duwanaanshaha qowmiyadeed – iyo kuwo kale – una soo saaraan qaababka goobaha ee dhaqameed. Hubinta dadka inta ugu badan ay saameeyeen sinnaan la'aanta bulsheed inay joogaan oo ay ka qaybqaadanayaan dedaalka iskaashi waxa uu taageeraa qorshaynta muddada dheer ee u adeegaya sinnaanta iyo kamid noqoshada. Iyada oo ay hagayso CRT oo ay adeegsanayso muraayadda Caddaaladda Bulsheed ee Sinnaanta Qowmiyadeed (RESJ), habka qorshayntu waxa uu ka koobnaan doonaa saddex (3) marxaladood oo ka qaybgal ah: 1) Dhegaysi iyo Waxbarasho, 2) Fikrado iyo Xog, and 3) Ficil iyo Isla Xisaabtan.

### Marxaladda I: Dhegaysi iyo Waxbarasho

Nofeembar 2020 – Febraayo 2021

Yoolka marxaladda I waa in la fahmo macnaha bulsho-goobeed ee dugsiyada jaarka iyo guud ahaan Degmada iyo sidoo kale fikradaha, khibraha, iyo himilooyinka bulsho-goobeedka ay ka haystaan xubnaha bulshadu. Iyada oo la adeegsanayo xaddi ah xeelado wacyi gelin oo loo dhan yahay oo lagu dhafay qorshe baadhis oo wejiyo badan, Marxaladda I waxa ay ka warbixin doontaa fahan dhamaystiran baahiyaha, ujeedooyinka waxbarasheed, iyo rejooyinka iyo riyooyinka xubnaha bulshada ee Degmada. Xeeladaha wacyigelinta loo dhan yahay waxa kamid ah in si toos ah loola shaqeeyo kooxo, shabakado, iyo ururo jira kuwaas oo metela una adeega bulshooyinka la faquuqay. Xogta ardayda si u kas ah ayaa loo raadin doonaa iyada oo si dhaw loola shaqaynayo macallimiinta dugsiga hoose, dhexe iyo sare ee PPS iyo sidoo kale kooxaha ardayda. Adeegsiga qaabka "isku xidhnaanta" ayaa ah xeelad kael oo la xidhiidhid ah taas oo awood u siin doonta kooxaha dadka inay isugu yimaaddaan aqoonsiyo ay wadaagaan, kobcinta dareenka raaxada marka la wadaagayo sheekooyinka oo la soo saarayo fikradaha si loo wargeiyo qorshaynta xarumaha muddada dheer. Kooxaha isku xidhnaantu waxa ay taageeraan ka qaybqaadashada loo dhan yahay iyaga oo xoojinaya codka bulshooyinka taariikh ahaan la fogeeyey ama lagu calaamadiyey hababka xidhiidhitaanka ee dhaqameed.

### Marxaladda II: Fikradaha iyo Xogta

Febraayo 2021 – Maajo 2021

Yoolka Marxaladda II waxa uu noqon doonaa in la isku keeno oo la falanqeeyo natiijooyinkii baadhista kuwaas oo ka turjumaya codadka iyo sheekooyinka bulshooyinka iyo daneeyayaasha geedi socodka qorshaynta. Iyada oo la adeegsanayo CRT iyo falanqaynta bulsho-goobeed, Degmadu waxa ay ka shaqayn doontaa fahanka iyo u turjumidda sheekooyinka iyo fikradaha isku maran ee hodanka ah aragti si wanaagsan u qeexan taas oo u noqon karta sees Qorshaha Xarumaha Muddada Dheer ee PPS. Marxaladdan, Degmadu waxa ay sii wadi doontaa ka qaybqaadashada bulshada iyada oo wadaagaysa wixii aanu ka baranay dedaaladii baadhista Marxaladda I kuna casuumaysa xog qorshayaasha qabyo qoraalka ah kuwaas oo isku daraya baahiyaha bulshada, ujeedooyinka waxbarashada, iyo sheekooyinka xubnaha bulshada.

### Marxaladda III: Ficilka iyo Isla Xisaabtanka

## Juun 2021 – Oktoobar 2021

Marxaladda III, aragtida lagu abuuray marxaladaha hore waxa ay noqon doonaan seeska qaabka xeeladeed ee dhukumentiga Qorshaynta Xarumaha Muddada Dheer ee PPS, taas oo bixinaysa tallaabo cad oo wax loogu qabanayo baahiyaha xarunta Degmada 20 ka sano ee soo socda. Qorshaha ugu dambeeyaa waxa uu isku duba ridi doonaa farshaxanka sheekooyinka, wadasheekaysiyada, doodaha, iyo khibradaha la wadaagay waxana ay ka dhigi doonaan hummaag cad oo midaysan oo meesha loo socdo oo midaysan ah. Taas waxa dheer, qorshuhu waxa uu qeexi doonaa farsamooyinka isla xisaabtanka oo ay ku jiraan isbeddelada siyaasadda Degmada ee la soo jeediyey si loo hubiyo geedi socod qorshe iyo qaabayn caddaaladeed oo mashaariicda dhismaha raasamaalka mustaqbalka ah.